

# Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)



# Buugga Tilmaanta Bilawga Degdega ah

Maajo 2020-ka



Caymiska caafimaadka oo lacag la'aan ah  
oo uu bixiyo gobolka Oregon

# Ku soo dhowoow

## Qorshaha Caafimaadka Oregon

**Buugan tilmaamuhu wuxuu kaa caawin doonaa in aad OHP u isticmaasho sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah, si uu kaaga caawiyo.**

### Tusmada

Sida loo isticmaalo OHP aad leedahay.....	3
Sida aad u haysan lahayd OHP aad leedahay .....	6
Isbeddelada la soo sheegayo .....	7
Waxa ay faa'iidooyinku yihiin.....	8
Sida loo helo caawimaad .....	9

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo  
**OHP.Oregon.gov**



**800-273-0557**  
(TTY 711)

# Sida loo isticmaalo OHP aad leedahay

**Ku soo dhowoow OHP! Raac saddexdan tallaabo sida u bilawdo helida daryeelka.**



## 1 Baro CCO aad leedahay

OHP waxay leedahay qorshaha caafimaadka degaanka oo kaa caawiya in aad isticmaasho faa'iidooyinkaaga. Qorshayaashani waxaa loo yaqaan

daryeelka ururadu iska kaashadeen ama CCO. Inta badan xubnaha ka tirsan OHP waxaa la qoray CCO.

**CCO-gaagu wuxuu kaa caawin karaa in aad hesho daryeelka aad u baahan tahay.** CCO-gaagu wuxuu la shaqeeyaa daryeel bixiyayaasha sida dhakhaatiirta, la taliyayaasha, kalkaalisooiyinka iyo dhakhtarada ilkaha ee kuu dhow. Waxaad liiska daryeel bixiyayaasha ka heli kartaa website-ka CCO-gaaga. Waxaad sidoo kale wici kartaa CCO-gaaga oo aad ka codsan kartaa liiska.

**Haddii aad ku cusub tahay OHP,** CCO-gaaga ayaa kuu soo diri doona warqad soo dhawayn ah iyo kaarka aqoonsiga qiyaastii muddo laba toddobaad ah ka dib marka aad hesho OHP.

- **Haddii aad ubaahan tahay in aad daryeel hesho ka hor wakhtigaasi,** waxaad la xiriiri kartaa daryeel bixiye kasta oo qaata OHP.

**Waxaa laga yaabaa in aadan ku jirin CCO** iyada oo sababtu tahay adiga oo haysta caymis kale ama leh sabab kale oo caafimaad oo aadan u isticmaalayn CCO. Tani waxaa loogu yeeraa haysashada kaar furan 'open card' ama kharashka adeega la bixiyo 'fee-for-service'.

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo  
[OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557  
(TTY 711)

# 2

## Dooro daryeel fidiyahaaga



**Daryeel bixiyaha aasaasiga ahi** waa cidda aad ku arki doontid oo loogu talagalay aadida/boogashada caadiga ah, daawooyinka la isku qoro iyo daryeelka. Waxaad dooran kartaa mid, ama CCO-gaaga ayaa kaa caawin doona in aad mid doorato. Daryeel bixiyayaasha aasaasiga ahi waxay noqon karaan dhakhaatiir, kalkaalisooyinka sare iyo kuwo dheeraad ah. Ha ilaawin in aad CCO-gaaga weydiiso waxyaabo ku saabsan dhakhtarka ilkaha iyo daryeel bixiyaha caafimaadka dhimirka.

**Haddii aadan dooran daryeel bixiye aad rabto in aad aragto, CCO-gaaga ayaa mid kuu xuli doona.** CCO-gaaga ayaa kuu soo diri doona warqad ay la socdaan macluumaadka daryeel bixiyahaaga. Kaararka aqoonsiga ee CCO qaarkood waxaa sidoo kale ku qoran daryeel bixiyayaaga.



**Waxaad daryeel bixiyayaasha ka raadin kartaa [bit.ly/CCOplans](http://bit.ly/CCOplans).** CCO-gaaga ka hel liiska isla markaana riix Buuga tilmaamaha Daryeel bixiyaha “Provider Directory.”  
**Ma haysatid miyaa CCO?** Wac **800-562-4620** si aad u hesho caawimaad ah helida daryeel bixiye.

Nooca daryeelka	Tusaalooyin
<b>Daryeelka aasaasiga ah</b> Marka aad u baahan tahay ballan	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Aad dareemayso jiro</li> <li>• Baaritaanka joogtada ah ama jireed</li> <li>• Daawada cusub ee la isku qoro</li> </ul>
<b>Daryeelka degdega ah</b> Marka aad u baahan tahay daryeel maanta balse aadan arki karin dhakhtarkaaga	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Gubashada yar</li> <li>• Kala baxa muruqa</li> <li>• Murgacashada canqowda</li> </ul>
<b>Qolka gargaarka degdega ah</b> Marka aad daryeel u baahan tahay hadda kaasi oo loogu talagalay jiro halis ah ama dhaawac	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Dhiig bax aan joogsaneyn</li> <li>• Laf jabtay</li> </ul>

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)



**800-273-0557** (TTY 711)

# 3

## Ballan sameyso



**Waxaad ballan la sameysan kartaa daryeel bixiyahaaga isla marka aad doorato mid.** Daryeel bixiyayaasha u sheeg waxyaabo ku saabsan OHP, CCO aad leedahay iyo caymis caafimaad oo kale ee aad haysato. Kaarkaaga aqoonsiga hayso marka aad wacayso.

**Soo qaado liiska su'aalaha si aad u weydiiso daryeel bixiyahaaga.** Diyaar u noqo in aad ka hadasho taariikhda caafimaadka qoyskaaga, wixii daawooyinka la isku qoro ah, fiitamiinada ama daawooyinka kale ee aad qaadato.

**Waxaa dhici kara in daryeel bixiyahaagu ku siiyo daawo la isku qoro ama tilmaamo la raacayo waqti dambe.** Haddii aadan fahmin, weydii su'aalo. Daryeel bixiyuhu wuxuu halkaasi u joogaa in uu ku caawiyo.



**Ma u baahan tahay gaadiid raac?** Gaadiid raacidu waa mid lacag la'aan ah. Haddii aad u baahan tahay gaadiid raacis lagu aadayo ama lagaga soo noqonayo ballantaada, waxaad wacdaa CCO-gaaga. Haddii aadan haysan CCO, waxaad wacdaa adeega gaadiid raacida ee OHP ee degaankaaga. Wixii la xiriira liiska adeegyada gaadiid raacida, booqo [bit.ly/ridesohp](http://bit.ly/ridesohp).



**Ma u baahan yahay turjubaan?** Bixiyahaaga OHP ayaa kaa caawin doona in aad hesho mid. U sheeg xafiiskaaga daryeel bixiyaha luqadda ama rugta caafimaadka ee kuu fiican. Kula socodsii hal ama laba maalmood ka hor ballantaada. Weli ma u baahan tahay caawimaad? Wac 844-882-7889.

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557 (TTY 711)

# Sida aad u haysan lahayd OHP aad leedahay

## Dib u cusboonaysii barnaamijkaaga OHP

Waxaan u baahanahay macluumaad cusub sanad kasta si loo xaqiijiyo in aad wali u qalanto caymiska OHP. Tani waxaanu ugu yeernaa dib u cusbooneysiinta OHP. Marka ay tahay wakhtigii dib u cusbooneysiinta, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad.



Warqad ka  
hel OHP



Raac  
tilmaamaha  
si loo  
cusbooneysiyo



OHP sii wixii  
macmuulaad  
dheeraad ah  
ee ay codsato



Haddii aad  
weli u qalanto,  
OHP aad  
leedahay ayaa la  
cusbooneysiyaa!



**Waxaad isticmaali kartaa koontada 'account' aad internet-ka ku leedahay si aad u fiiriso OHP aad leedahay.**

Booqo [ONE.Oregon.gov](http://ONE.Oregon.gov) si aad u gasho ama isku qorto.



**OHP aad leedahay way joogsan kartaa haddii aan haysano cinwaan khaldan.**

Noo sheeg marka aad guurto. Si markaas, aan kaala soo xiriiri karno waxyaabaha ku saabsan OHP aad leedahay.



**Waxaad leedahay xuquuq xubin ka tirsan OHP ahaan.**

Booqo [bit.ly/myohprights](http://bit.ly/myohprights) si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo  
[OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557  
(TTY 711)

# Isbeddelada la soo sheegayo

## Soo sheeg isbedelada

U sheeg OHP marka aad yeelato isbeddelo dhanka nolasha ah sida uur, guurka, shaqo cusub, ama cinwaan cusub. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan yahay in aad wax nooga sheegto isbeddelada sida qof soo degaya ama ka guuraya gurigaaga, aadaya jeelka, ama helaya caymis caafimaad oo cusub.



Waxaad liiska buuxa ee isbeddelada ay tahay in aad sheegto iyo sida loo soo sheego ka arki kartaa [bit.ly/ohpchanges](https://bit.ly/ohpchanges).

## U isticmaal mid ka mid ah siyaabahani si aad u soo sheegto isbeddelada:



**Internet-ka:** Isticmaal koontadaada [ONE.Oregon.gov](https://ONE.Oregon.gov).



**Telefoonka:** Wac 800-699-9075, TTY 711 oo noo sheeg.



**Email-ka:** Booqo [bit.ly/ohpsecure](https://bit.ly/ohpsecure) si aad email-ka la isku halayn karo ugu soo dirto [OregonHealthPlan.Changes@dhsosha.state.or.us](mailto:OregonHealthPlan.Changes@dhsosha.state.or.us).



**Si shakhsi ah:** Si aad u ogaato xafiis kuugu dhow ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS), booqo [oregon.gov/DHS/Offices](https://oregon.gov/DHS/Offices).

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo  
[OHP.Oregon.gov](https://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557  
(TTY 711)

# Waxa ay faa'iidooyinku yihiin

## Xubnaha ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon badankoodu waxay leeyihiin faa'iidooyinka OHP Plus.

**OHP Plus** waxay bixisaa caymiska caafimaad, ilkaha, iyo daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka. Tusaalooyinku waa:

- + Daryeelka caafimaadka, sida baaritaannada, irbadaha iyo raajatada 'X-rays'
- + Daryeelka ilkaha, sida nadiifinta, fluoride, buuxinta, iyo saarida ilkaha
- + Xakameynta uurka iyo qorshaha qoyska
- + Joogida istibaalka
- + Daawooyinka la isku qoro
- + Daawaynta jirka, dhaqdhaqaaqa jirka iyo hadalka
- + Adeegyada caafimaadka dhimirka, sida la talinta
- + In aad hesho taageero laga geysanayo dhibaatooyinka isticmaalka sigaarka, aalkolada iyo daroogada
- + Daryeelka degdega ah
- + Gaadiidka lagu aadayo balamaha daryeelka caafimaad
- + Daryeelka arraga ee loogu talagalay carruurta ilaa da'doodu gaarayso 21 jir iyo haweenka uurka leh

## Caymiska degdega ah oo kaliya (CAWEM)

Qaarka ka mid ah dadka waaweyn ee aan buuxin shuruudaha looga baahan yahay xaalada deganaansho waxay leeyihiin caymiska CAWEM. Waxaa sidoo kale loo yaqaanaa **Medicaid degdega ah**. Wuxuu bixiyaa caymiska degdega ah, sida daryeelka aad ku hesho qolka gargaarka degdega ah iyo raacida gaadiidka ambalaaska.

## CAWEM Plus iyo xubnaha ka tirsan OHP ee leh xubnaha Daawada Xaddidan waxay haystaan faa'iidooyinka la mid ah OHP Plus, ee kor ku qoran.

- + CAWEM Plus waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee uurka leh ee aan buuxin shuruudaha looga baahan yahay xaalada deganaansho.
- + OHP leh Daawada Xaddidan waxaa loogu talagalay dadka haysta OHP iyo Medicare Part D.

## Medicare la wadaago kharashka oo kaliya (QMB)

Qaarka ka mid ah dadka waaweyn ayaa u qalma Medicare laakiin ma aha Medicaid. Waxaa dhici karta in ay helaan caymiskooda la wadaago 'coinsurance' iyo lacagaha qaybta dadka kaga soo aada 'premiums' ee Medicare Part A iyo B oo ay bixiso OHP. Tani waxaa loo yaqaan QMB. Daryeel bixiyayaashu biilashani uma diri karaan QMB taasi oo la xiriiirta lacagaha harsan 'balances' ee daryeelka caafimaad ee ay Medicare bixiso.

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo  
[OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557  
(TTY 711)



# Sida loo helo caawimaad

## Wac CCO-gaaga haddii aad:

- Baahan tahay in lagaa caawiyo sidaad balan u samaysan lahayd
- Taageero uga baahan tahay helitaanka daryeel fidiye ama aad rabto in aad bedesho daryeel fidiyahaaga.
- Hayso su'aalo ku saabsan caymis daboolida ama adeegyada
- Hesho biil lagu soo diray

Wixii la xiriira liiska lagala xiriirayo CCO, booqo [bit.ly/CCOplans](https://bit.ly/CCOplans) oo riix halka ay ku qoran tahay qorshayaasha CCO "CCO plans."

## Wac Adeega Macmiilka 800-273-0557 (TTY 711) haddii aad:

- Rabto in aad bedesho CCO-gaaga
- U baahan tahay kaarka aqoonsiga OHP
- Aanad ka tirsanayn CCO oo:
  - Aad rabto in aad isqorto CCO
  - Hesho biil lagu soo diray
  - U baahan tahay in lagaa caawiyo sidaad balan u samaysan lahayd
  - Aad hayso su'aalo ku saabsan caymis daboolida



**Buug Gacmeedka OHP ayaa laga helayaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan caymiskaaga.** Si aad nuqul u hesho, booqo [OHP.Oregon.gov](https://OHP.Oregon.gov) ama wac 800-273-0557 (TTY 711).

## Wac Adeega Macmiilka OHP 800-699-9075 (TTY 711) haddii aad:

- Hayso su'aalo ku saabsan codsigaaga
- Uur yeelato ama uurkaagu dhamaado
- Bedesho cinwaanka boostada, cinwaanka email-ka ama lambarka telefoonka

## Hel caawimaad dhanka degaanka ah

- Si aad u ogaato xafiiska DHS oo kuu dhow, booqo [oregon.gov/DHS/Offices](https://oregon.gov/DHS/Offices).
- Qofka bulshada u adeega oo ay aqoonsan tahay OHP ayaa kaa caawin kara codsigaaga. Mid ka hel [bit.ly/ohplocalhelp](https://bit.ly/ohplocalhelp). Taageeradani waa lacag la'aan ah.

**Taageero ma u baahan tahay?** Waxaad heshaa Buug Gacmeedka OHP



Booqo [OHP.Oregon.gov](https://OHP.Oregon.gov)



800-273-0557 (TTY 711)



**Caymiska caafimaadka oo lacag la'aan ah**  
oo uu bixiyo gobolka Oregon



**Buug Gacmeedka OHP ayaa laga helayaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan caymiskaaga.**

Si aad nuqul u hesho, booqo [OHP.Oregon.gov](https://www.ohp.oregon.gov) ama wac 800-273-0557 (TTY 711).

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Qorshaha Caafimaadka Oregon kala xiriir 800-273-0557. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.